




(uten bilder)

Tessa Welch ✎  
Wiehan de Jager 🗣️  
Abdi Muse 📄  
somal! 🗣️  
nivå 3 📖



Nozibele iyo saddexdii timo

Barnebøker for Norge

[barnebok.no](http://barnebok.no)



Nozibele iyo saddexdii timo

Skrevet av: Tessa Welch

Illustrert av: Wiehan de Jager

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge ([barnebok.no](http://barnebok.no)), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.


Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no)


<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no>



Wakhti dheer ka hor, saddex gabdhood ayaa u baxay inay soo guurtan qoryo.



Waxay ahayd maalin kuul sidaa darteed  
waxay aaden webiga si ay ugu soo  
dabaashaan. Way cayaaheen waxayna  
firdhiyeen kuna dabaasheen biyaha.




Dabadeed eeygi waxuu ogaaday in  
Nozibele ay sirtay. Sidaas darteed eeygi  
wuu orday oo ku orday wadadi illaa iyo  
tuulada. Laakiin walaalaha Nozibele ayaa  
halqaas ku sugayay iyagoo ulo waaweyn.  
Eeygi wuu jeestay oo wuu cararay,  
waliigiisna dib looma arag.




Si kadis ah, waxay xaqiiqsadeen in ay yihiin kuwa daahay. Waxay dib ugu soo dagdageen tuulada.



Markii eygii dib u soo laabtay, wuxuu raadiyay Nozibele. “Nozibele, xagee baad joogtaa?” ayuu ku qayliyey. “Waa ikan, sariirta hoosteeda,” ayay tiri tintii ugu horraysay. “Waa ikan, albaabka ka gadaashiisa,” ayay tiri tintii labaad. “Waa ikan, gudaha xerada,” ayay tiri tintii saddexaad.



Markii ay ku dhawadeen guriga, Nozibele  
waxay saartay gacenteeda qoorta. Waxay  
soo ilowday silsiladeedii! "Fadlan ila  
laabta!" ayay kabariday saaxiibadeeda.  
Laakiin saaxiibadeeda waxa ay dhaheen  
waa xilli! aad u dambe.




Dhaxhsaba sidaas tuu eeyga u tagay,  
Nozibele ayaa madaxa ka soosiihtay  
saddex timood. Waxay hal tin dhigtay  
sariirta hoosteeda, mid kalane albaabka  
gadaashiisa, midna gudaha xerada.  
Kadibna waxay u carartay guriga sida ugu  
dhaxhsaha badan oo ay awooday.




Sidaas darteed Nozibele ayaa kaligeed dib ku laabatay webiga. Way heshay silsiladeedi waxayna usoo dhaqsatay guriga. Laakiin waxay ku luntay mugdiga.



Maalin kasta waxay ku qasbanayd in ay wax kariso, nadiifiso oo u dhaqdo eeyga. Dabadeedna, maalin aya eeygii yidhi, “Nozibele, maanta waa in aan booqdaa saaxiibo, nadiifi guriga, cuntada kari, oo dhaq alaabta kahor intaan soo laaban.”




Meel fog waxay ka aragtay iftiin ka  
imaanayo aqal. Waxay u dhakhsatay  
dhinacisa waxayna garaacday albaabka.



Kadib eeygi! wuxuu yidhi, "Sariirta !!  
hagaaji!" Nozibele ayaa ku jawabtay,  
"Waligay marna sarir uma hagaajinin  
ey." "Sariirta hagaaji, ama waan ku  
qaniini doonaa!" ayuu eeygi yidhi. Sidaas  
darteed Nozibele way hagaajisay sariirti.



La yaabkeda, ey aya ka furay albaabka oo ku yidhi, “Maxaad doonaysaa?” “Waan lumay waxaana u baahanahay meel aan seexo,” ayay Nozibele tidhi. “Soogal, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu yidhi eygi. Sidaas darteed Nozibele way gashay gudaha.



Kadib eeygii wuxuu ku yidhi, “Cunto ii kari!” “Laakiin waligay marna wax uma karrinin eey,” ayay ku jawaabtay. “Kari, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu eeyga yidhi. Sidaas darteed Nozibele waxeey xoogaa cunto ah u karisay eeygii.